Shirweynhii soomaaliyeed ee ka dhacay maalintii khamiista 27/05-2010 magaalada 2aad ee Denmark Århus.

HORDHAC

Waxaa caasumadda 2aad ee dalka denmarka kunoo dad soomaaliyeed (jaaliyad) tiradoodu tahay ilaa 3750 qofood. Dadkaas kala barkood waxay kudhasheen magaaladan ay ku nool yihiin.

Wayaddaan dambe waxaa jirtay inay dadkan laga tirade badan yahayee soomaaliyed ee kunoo magaaladan Århus ay soo wajahayeen arino meelkaga dhacaya sharaftooda iyo cirdigoodaba:

Arimahaan ayaa waxaa ka mid ahaa in lagu soo ee deeyay dhalinta soomaaliyeed ee kunool magaaladan inay yihiin dhibaato kusoo wajahan bulshada kale ee ay la nool yihiinoo deenish-ka ah.

Waxaa kale oo lagu soo ee deeyey oo been abuur ah inay bulsha soomaalidu tahay mid dhinac socota tan deenish-ka oo ay san ahayn mid dhex socota.

Arimahaan iyo arimo kale oo farabadanba waxaa nasiib daro ku andocooday dad soomaaliyeed isla markaana ku codsaday arimo dhaqaale iyagoo ku andacoonaya inay hagaajinayaan arimanahaan, ka na hortegayaan dhibaatada kaga soo wajahan deenishka dhinaca soomaalida.

Arinkaan ayaa waxaa aad iyo aad uga dhiidhiyey bulshada soomaaliyeed oo ah mid aad iyo aad ufirfircoon isla markiiba ku baraarugay dhibaatooyinka ka soo wajihi kara.

Waxaa isla markii ba isutegay illaa 13 urur oo soomaaliyeed oo aad wax uga qabta dhibaatooyinka soo wajjaha bulshadooda. 13 kaan urur ayaa isugu jiray ururo: Waayeel , Jamciyado , Haween, Dhalinyaro, Aqoonyahano iyo waxgaradkaleba. [www.aarhusomali.dk].

Waxaa kale oo ka xumaaday waxyaalihii soomaalida laga qoray dad deenish ah oo aad ufara badan oo kutilmaamay in soomaalida lagu hayo cunsuriyad ama midab takoor. Dadkaas oo sigu jiray xisbiyada yiyaasadeed ee waddankaan ka jira oo ay kamid ahaayeen (SF, Konservative, Radikale Venstre iyo Enhedslisten). Waxaa kale oo ka mid ahaa dadkaan nala qayb sadey dhibaatadii iyo caydii lagu hayey dadka soomaaliyeed dad Joornaalista yaal ah, ururcaadi ah iyo ururada ka soo horjeeda midabkala sooca.

Ururadaan iyo dadkaan soomaaliyeed ayaa waxay uguntadeen illaa sadexdii bilood ee la soodhaafay sidey udifaaci lahaayeen dadka soomaaliyeed ayna utusin lahaayeen bulshada deenish-ka in aysan soomaalidu ahayn dad ay ka suuroobaan waxa lagu soo eedeeyay.

Shirkaan ayaa waxaa uu ukala qaybsanaa labo qaybood oo kala ahaa :

- Bandhig dhaqameed ay soomalida magaladan degani ku soo bandhigeen gugiga caanka ka ah magaalada Århus (Musikhuset)

- Shirweyne soomaaliyeed oo looga arin sanayay sidii dhibaatooyinka noocan ah meel looga soo wada jeensan oo looga midoobila haa (shirkan ayaa ka dhacay brabrand foreningshuset).

UJEEDOOYINKA:

Bandhig dhaqameedka ayaa waxaa aad xooga loo sarayay suuqagaanta, dhaqanka, cuntada iyo lebisha dhaqanka soomaaliyeed iyo weliba taariikhda soomaaliya, waxaana arinkaan xoogga saaray oo ka qayb qaatay ururadii deenishka ahaa.

Bandhigaan ayaa ujeedada ka danbayso ahayd in loo soo bandhigo bulshada deenish ka ah dhaqanka soomaalida iyo horumarka ay ka sameeyeen wadankaan intii ay ku noolaayeen. Waxaa kale oo loogu sheegaayay bulshada deenishka inaysan sax ahayn waxyaalihii lagu soo eedeeyay mujtamaca soomaaliyeed eek u nool magaaladaan.

Ujeedooyinka shirwaynaha qaybta soomaalida ayaa ahayd, midaynta jaaliyadda soomaaliyeed ee Århus iyo sidii ay isaga difaaci lahaayeen. Weerarada kaga yimaadda dhinaca cunsuriyadda.

MARTISHARAFKII KA SOO QAYBGALAY SHIRKA

Waxaa shirarkaan ka soo qayb galay, khudabado iyo suugaan qiimo bandanna ka soo jeediayay. Marti sharaftaan hoos ku qoran waxaana ka mid ahaa:

1. Imaam: Rashiid Cabdi Guraa (Aarhus, Denmark)
2. Xaaji: C/llaahi Habane (Aarhus, Denmark)
3. Danjire (EU): Nuur Xssan Xussein (Biljam.)
4. Danjire (UN): Yusuf Mohamed (Bari Bari) (Geneve):
5. Abwaan: Barre Mohamed Fiidoow (Aarhus, Denmark)
6. Aqoon yahan: Axmed Faarax Ducaale lahaa (Copenhagen, Denmark)
7. Abwaanad: Xaliima Soofe (Aarhus, Denmark)
8. Aqoonyahan/Abwaan: Khalid Ali Guul (Copenhagen, Denmark)
9. Farshaxan: Amiin Caamir (Canada)
10. Engineer: Axmed Jibril Cabdi (Aarhus, Denmark)
11. Mulki Cabdi Xuseen (Aarhus, Denmark)
12. Mustafe Jaamac (Aarhus, Denmark)
13. Rabiic Axmed Al-asad (vice Major) (Aarhus Denmark)

Waxaa kaloo kulanka ka qayb galay hadalana ka soo jeediyay madax ka tiran xisbiyada deenishka ee degmada Aarhus.

QIIMAYNTA SHIRARKA

Shirarkaan abaabulkoodu wuxuu soo maray marxalado kala duwan, iyagoo mar walba ka shidaal qaadanayay, gudiyadii qabanqaabada. Iyo kasbashadii ay kasbadeen dadka deenishka ah ee ku nool magaaladaan Aarhus, taasi markhaati ma doonta ah, siday uga soo qayb galeen golaha murtida iyo madadaalada ee magaaladan Aarhus.

Dhanka soomaalidana, wali taariikhda magaaladaan Aarhus ma dhicin jamaahiir soomaaliyeed ka soo qayb gala kulan caynkaas ah. Jaamhiirtaas oo ka koobnayd qaybaha bulshada, sida, Haweenka, dhalinyarada, odoyaasha iyo aqoonyahanka.

Dadka ka soo qayb galay tiradooda waxaa lagu qiyaasay labada gooboodba ilaa 600 qof, wajiyada bulshadii kulamada ka soo qayb gashay waxaa ka muuqday farxad iyo rayrayn.

Saxaafadda deenish iyo soomaalba ayaa dhamaystiran uga soo qayb galay kulamada.

Waxaa ka mid ahaa saxaafaddii ka soo qay gashay kulanka
Universal TV
Puntlandi.com
Jyllands Posten
Aarhus Stiftidende
Allpuntland.com
Allidamaale.com
DR TV
Iyo Tv-yo lookal ah oo farobadan.

Saxaafadda deenishka ayaa waxay ka qortay shirarkii soomaalida maqaalo aad kor ugu soo qaaday sumcadda soomaalida.

Ugu danbayntii waxaa la isku raacay, in talaabo soomaalida u dan ah horay loo qaado, lana helo hogaamin jaaliyad midaysan.

Kala xiriir:

Abdirahman M. Iidle: Tlf. 27 28 52 57
Abdirashiid Sheik: Tlf. 28 50 31 90

Email: iidle3@gmail.com